


Ka isticmaalida Qaybta Turjumaada Zoom Kumbuyuutarka Windows | macOS

- 1) Marka aad ku biirto shirka oo martigeliyaha uu daaro qaybta tarjumaada, waxaad dooran kartaa luqadaada adiga oo aadaya astaanta tarjumaada oo dooro ikhtiyaarka luqadaada. Astaanta tarjumaada waxay ka soo muuqan doontaa geeska midig ee hoose ee shaashadda, una dhow batanka 'End (Jar)' ama 'Leave (Ka bax)' ee gaduudan.



Luuqadaadu ayaa ka soo muuqan doonto halkan haddii la taageero. Tusaalahan waxaan ku arkaynaa Isbaanish iyo Ingiriis ayaa diyaar ah. Tan waxaad ka arki kartaa sawirka hoose.




2) Haddii aad u doorato [SOMALI] inay tahay luqadda aad door bidayso, waxaad hadda maqli doontaa turjubaanka [SOMALI] oo hadlaya.

Waxaad ku jiri kartaa kanaalkan inta bandhiggu socdo.


Ka isticmaalida Qaybta Turjumaada Zoom Taleefoon Casri ah Android | iOS

1. Koontaroolada kulanka, ku dhufo astaanta saddexda dhibic ah:
● ● ●
2. Taabo **Language Interpretation (Turjumaada Luuqad)**.






INGCO International
1330 Lagoon Ave, Minneapolis, MN 55408
hello@ingcointernational.com
+1 (612) 605 8006



3. Taabo luqadda aad rabto inaad maqasho
4. Sida caadiga ah, marka tarjumaadu shaqaynayo, ka qaybqaataha waxa uu maqlaa 90% turjubaan, 10% qofka hadlaya, si codka loo fahmo. Tan waxa lagu aamusiin karaa iyada oo la taabanaya Mute Original Audio off (Aamusii Codka Asalka ah) (Ikhtiyaar).



5. Riix **Done** (La bogay).



INGCO International
1330 Lagoon Ave, Minneapolis, MN 55408
hello@ingcointernational.com
+1 (612) 605 8006


Xog Muhiim ah

- Hubi inaad kaga soo biirto laptop-kaaga, teleefankaaga ama tablet-kaaga adigoo isticmaalaya **Ablikeeshinka Zoom**. Haddii aad kaga soo biirto biraawsarkaaga, ma awoodid inaad isticmaasho qaybta tarjumaada
- Hubi in ablikeeshinka Zoom la cusboonaysiiyay. Si aad u hubiso wixii cusub fadlan raac tilmaamaha hoose:

1. Ka fur Ablikeeshinka Zoom aaladaada MAC ama PC.

2. Ka guji sawirka astaantada dhanka midig ee sare. Haddii aadan bedelin sawirkaaga, summadu waxay u muuqan doontaa sida xarfaha magaca oo ku jira afargees midab leh.

3. Ka dooro "Check for updates (Hubi Cusboonaysiinta" liiska hoos u dhaca Haddi ablikeeshinkaaga yahay midkii ugu danbeeyay, waxa kuu muuqan doona qoraal sidaas kuu sheegayo. Haddii aad u baahan tahay cusboonaysiin, Zoom si toos ah ayuu u bilaabi doonaa inuu cusboonaysiiyo ablikeeshinkaaga oo ma awoodi doontid inaad furto ama aad ku biirto wicitaannada.



4. Guji "Done (La sameeyay)" si aad u xirto qoraalka soo baxay.

